# Qorshaha Qabyo-qoraalka Shabakadda Kormeerka Hawada ee Minnesota 2027

## Guudmar Kooban

### Waa maxay kormeerka hawada deegaanka?

Kormeerka hawada deegaanka waa cabbiridda heerarka wasakheeyayaasha kala duwan ee ku jira hawada bannaanka. MPCA waxay raacdaa xeerarka iyo shuruucda ay dejisay EPA. Inta badan qalabka kormeerka waxaa la dhigaa muddo dheer si loo ogaado heerka gaadhista muddada-dheer ee wasakheynta loona dabagalo sida heerarka wasakheyntu isu beddelaan.

### Maxaan u kormeernaa tayada hawada deegaanka?

Xogta ay ururiso MPCA waxaa loo isticmaalaa ujeeddooyin kala duwan, oo ay ka mid yihiin:

- La socodka u hoggaansanaanta Heerarka Qaranka ee Tayada Hawada Deegaanka (NAAQS).
- U soo bandhigista dadweynaha Tusmada Tayada Hawada (AQI) iyo saadaasha tayada hawada.
- Qiimeynta heerka gaadhista iyo khatarta dadka, iyo la socodka ilo gaar ah oo sii daaya wasakheynta.
- Go’aaminta isbeddellada wasakheynta iyo raadinta siyaabaha lagu yareyn karo heerarka wasakheynta.
- Baaritaanka xaaladaha asalka ah ee deegaanka.
- Qiimeynta moodallo kombiyuutar.

## Xaggee Ku Yaallaan Goobaha Kormeerka?




Hay’adda Xakamaynta Wasakheynta Minnesota (MPCA) waxay kormeertaa tayada hawada deegaanka ee guud ahaan Minnesota. Minnesota waxaa ku yaal 62 goobood oo lagu kormeero tayada hawada deegaanka, kuwaas oo ay ku jiraan toddobo goobood oo qabiilooyin leeyihiin. Goobaha qabiilooyinka waxaa leh oo maamula dawladaha qabiilooyinka, waxaana qayb ahaan taageera MPCA. Goobaha qaar waxay kormeeraan wasakheeyayaal badan halka kuwo kalena ay kormeeraan hal wasakheeye oo keliya.

Marka laga soo tago goobahan, waxaa jira shabakad qalabyo kormeer hawada ah oo warshadeed kuwaas oo ay leeyihiin oo maamulaan xarumo warshadeed gaar ah si ay ugu hoggaansamaan shuruudaha oggolaanshahooda

hawada ee ku saabsan kormeerka hawada deegaanka. Waxa kale oo jira shabakad dareemayaal tayada hawada bannaanka ah iyo xarun kormeer oo guurguurta kuwaas oo loo isticmaalo saadaasha tayada hawada iyo sahminta meelaha mustaqbalka laga samayn karo kormeer.no

## Maxaa la kormeerayaa?

MPCA waxay kormeertaa noocyo kala duwan oo astaamo iyo wasakheeyayaal hawada ah. Tani waxaa ka mid ah wasakheeyayaal sida walxaha yaryar ee hawada ku jira iyo ozone-ka, iyo sidoo kale astaamaha cimilada sida xawaaraha dabaysha iyo heerkulka.

MPCA waxay kormeertaa lixda wasakheeye ee uu dejiyay Xeerka Hawada Nadiifka ah ee 1970 si loo muujiyo u hoggaansanaanta Heerarka Qaranka ee Tayada Hawada Deegaanka (NAAQS). Wasakheeyayaashaas waxaa ka mid ah walxaha hawada ku jira (PM2.5 iyo PM10), lead (Pb), ozone (O3), nitrogen dioxide (NO2), sulfur dioxide (SO2), iyo carbon monoxide (CO). Walxaha guud ee hawada ku laalaada (TSP) iyo hydrogen sulfide (H2S) sidoo kale waa la kormeeraa si loo muujiyo u hoggaansanaanta Heerarka Tayada Hawada Deegaanka ee Minnesota (MAAQS).

MPCA waxay sidoo kale kormeertaa wasakheeyayaal khatar suurtagal ah ku ah caafimaadka dadka iyo deegaanka balse aan lagu xakameyn heerar qaran. Wasakheeyayaashan waxaa loo yaqaan sunta hawada waxaana ka mid ah isku-dhisyada dabiiciga ah ee uumi-baxa (VOCs), carbonyls, iyo biraha. Wasakheeyayaal kale ayaa lagu kormeeraa shabakado qaran, kuwaas oo ay ku jiraan roobka aashitada leh, meerkuri (Hg), PFAS, iyo falanqaynta kiimikaad ee $PM_{2.5}$.

## Sidee Ayaan U Kormeernaa Hawada Deegaanka?

Qalabyo kala duwan ayaa loo isticmaalaa kormeerka hawada deegaanka. Dhammaan qalabku waxay raacaan habab ay ansixiyeen gobolka ama dowladda federaalka si loo cabbiro loona ururiyo xogta. Qalabka iyo habraacyada shaqaduba waxay maraan tijaabooyin adag oo xaqiijinta tayada ah si loo hubiyo in dhammaan xogtu tahay mid sax ah oo lagu kalsoonaan karo.

Wasakheeyayaasha waxaa loo kormeeraa laba hab:

- Wasakheeyayaasha si joogto ah loo kormeero waxay xogta si toos ah ugu diraan kaydadka xogta ee MPCA. Akhrisyadu waxay ku yimaadaan waqti-dhab ah, sida shan ama 15 daqiiqo kasta ama saacad kasta. Xogta waxaa lagu ururiyaa laguna falanqeeyaa goobta lafteeda.
- Muunado ayaa lagu ururiyaa jadwal cayiman kadibna lagu falanqeeyaa shaybaarka. Muunaduhu badanaa waa celcelisyo 24-saacadood ah, waxaana la ururiyaa laga bilaabo saqda dhexe ilaa saqda dhexe mar saddexdii maalmoodba hal mar ama lixdii maalmoodba hal mar. Muunadaha waxaa laga soo qaadaa goobaha kormeerka kadibna waxaa loo qaadaa shaybaarka MPCA si loo sii falanqeeyo.

## Maxay Xogta Muujinaysaa?

- Heerarka wasakheynta hawada guud ahaan way hoos u dhacayeen in ka badan 20-kii sano ee la soo dhaafay
- Dhawaanahan, ma jirin wax ka badnaansho ah oo la xiriira:
  - carbon monoxide, ozone, oksaydhyada nitrogen-ka, iyo sulfur dioxide
- Dhawaanahan, waxaa jiray ka badnaansho la xiriira:
  - $PM_{2.5}$, lead, walxaha guud ee hawada ku laalaada (TSP), iyo $PM_{10}$

## Maxaa Isbeddelaya Sannadka 2027?

Isbeddellada soo socda ayaa lagu soo jeediyay qorshaha qabyo-qoraalka ah:

- Goobta 27-123-0868 (Ramsey Health Center) waxaa laga yaabaa in loo raro meel kale kadib markii dhismaha laga guuray oo uu bannaanaaday

# Xaggee Ka Heli Karaa Macluumaad Dheeraad Ah?

Qorshayaasha Sannadlaha ah ee Shabakadda Kormeerka Hawada ee Minnesota waxay bixiyaan faahfaahin ku saabsan kormeerka tayada hawada deegaanka ee Minnesota. Qorshayaashan waxaa sannad kasta loo gudbiyaa EPA si loo muujiyo u hoggaansanaanta xeerarka shabakadda kormeerka hawada, loo sharaxo isbeddellada la soo jeediyay ee sannadka soo socda, loona bixiyo macluumaad gaar ah oo ku saabsan goob kasta oo kormeer oo jirta ama la soo jeediyay. Waxaa lagu bixiyaa faahfaahin ku saabsan goobaha kormeerka, ujeeddooyinka kormeerka, iyo isbeddellada la soo jeediyay. Xogta dhowr wasakheeye ayaa sidoo kale la soo koobaa si loo muujiyo xaaladaha hadda jira marka loo eego heerarka tayada hawada ee gobolka iyo kuwa federaalka.

Qorshayaashii ugu dambeeyay ee Shabakadda Kormeerka Hawada ee Minnesota waxaa laga heli karaa internetka. Macluumaad dheeraad ah ama si aad u eegto qorshaha, booqo bogga kormeerka tayada hawada ee Hay'adda Xakamaynta Wasakheynta Minnesota Air quality monitoring webpage (https://www.pca.state.mn.us/air-water-land-climate/air-quality-monitoring).

Su'aalo ama walaacyo haddii aad qabto, fadlan la xiriir Kurt Anderson, kormeeraha Qaybta Kormeerka Hawada ee MPCA, adigoo adeegsanaya kurt.anderson@state.mn.us, 651-757-2192, ama cinwaankan:

Environmental Analysis and Outcomes Division
Minnesota Pollution Control Agency
520 Lafayette Road North
St. Paul, MN 55155